

KU: Qareennada Horn Legal Cosunsulting Services
Qareen Tahlil Xaaji Ahmed
Qareen Cabdikariim Maxamed Axmed
Qareen Amina Xaaji Axmed

Og: Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Benaadir =Muqdisho=

Taariikh: 26 Dseember 2017

Ujeedo: KA NOQOSHO WAKAALAD QAREEN.

Waxaan idinkaga mahdcelinayaa, sida hufan aad ii difaacdeen, dacwaddii horgeynta Maxkadda Gobolka Benaadir, hase yeeshee waxaan idinku wargelinayaa **inaan ka noqday idmashadii Qareen**, inaad igaga noqotaan Dacwadda siyaasadeysan uu XIG doonayo in igu socodsiiyo, si aan waafaqsaneyn sharcigu si cad ku cad:

1. Wuxuu XIG ku xadgudbay **Qod. 35 DFKM**, oo sheegaya:
 - a. in qof kasta bari yahay, ilaa xuun Dhaqangalay uu ku dhaco,
 - b. Qof kasta oo la xiri inuu xaq u leeyahay **in 48 gudohood** Maxkamad la horgeeyo;
2. **Wuxuu XIG isoo xiray**, iyadoo aysan jirin asbaabta ku xusan **Qodobada 34 -39, 38, 32 XHC**, isla markaana ku xadgudbay in uu raaco Qodobada **39 iyo 66 XHC**, maadaama uusan garsoorihii u geyn asbaabtii duruuftii iyo caddeymo ku kallifay,
3. Isla markaana Qodobbada uu igu eedeeyey ay qasab ka dhigayaan inuu heysto amar Maxkamadeed heysan maadaama ciqaabta ay ku jirto dil, waxayna kasoo horjeeday **Qod. 42 XHC** oo qasab ka dhigeysa inuu amar heysto, oo ah waajib uu sharciga saaray XIG, wuuna ku xadgudbay, **Qodobbada kala ah 50, 60, 70/2 e/2 XHC, iyo lala akhriyo 13/3, 39/3, 44/3, 30 iyo 77 XHC.**
4. Waxaa ka dhashay xarig sharci darro ah oo leygu sameeyay, iyo dil ulakac ah shan qof (5) oo ilaaladeyda ah iyo gabar, uuna ka qariyay eheladooda, lana sheegay in si qarsoodi ah loo xabaalay, iyadoon asbaabta dhimashada la caddeyn
5. ku kalliftay, mana keenin asbaabta ku xusan qodobbada **35 XHC**, , isgoo amar Maxkamad la'aantii leyga soo qabtay saqdii dhexe, gurigeyga la galo, Garsooraha la horgeeyo sida ku cad **Qod. 39 iyo 45 XHC**, Garsooraha waa inuu eego fulinta xariga, **XIG wuxuu qirtay ineysan haysan amar Maxkamadeed**, iyadoo weydiistay Garsooraha iney u baahan yihiin 5 maalmood si caddeyn u keenaan;

Waxaan maadaama si sharci darro ah iigu xadgudbay XIG, **iyadoo uusan Dalka ku jirin xaalad degdeg ah**, sida ku cad **Qod 131 DFKM**, igu socodsiiyay xadgudubyada kor ku xusan oo dhan, ayuu falalkaa foosha xun sameeyay, kuna xadgudbay waajibaadkii sharciga, isla markaana ku cad **Qod. 318, 447, 461, 462, 463, iyo 471 XCS**, isaga ayaan ku dacweynayaa, markuu dhammaado cadaadiska siyaasadeed, sidaas darteed, **waxaan ka noqday idmashadiinna, maanta wixii ka dambeeyana dacwaddaa ima matashaan**, maxaa yeelay ma aha XAQ.

Cabdiraxman Cabdishakur Warsame